

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 8aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2020

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2020

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

**2020**

**ANSIXINTA SHARCIGA HESHIISKA MIDOWGA AFRIKA EE LA-DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka “q” ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/346/2/B-10/20 Taariikh: 29/09/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Heshiiska Midowga Afrika ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

***Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Heshiiska Midowga Afrika ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa


**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2020**



Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



## **Nuqulka Soomaaliga ah**

# **HESHIISKA MIDOWGA AFRIKA EE KA-HORTAGGA IYO LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA**

## HESHIISKAMIDOWGA AFRIKA EE KA-HORTAGGA IYO LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

### **Hordhac**

Qaramada Xubnaha ka ah Midowga Afrika:

**Iyagoo tixgelinaya** in Xeerka Asaasiga ah ee Ururka Midowga Afrika uu aqoonsan yahay in xorriyadda, sinnaanta, cadaaladda, nabadda iyo sharafta ay yihiin himmilooyin muhiim ah ee gaaritaanka damaca xalaasha ah ee dadyowga Afrika;

**Iyagoo sii tixgelinaya** in Qodobka 3aad ee Xeerka Asaasiga ah ee la soo sheegay uu farayo Qaramada Xubnaha ah inay iskuduwaan oo ballaariyaan iskaashigooda, midnimadooda, wadajirkooda iyo dadaaladooda lagu gaarayo nolol wanaagsan oo ay helaan dadyowga Afrika;

**Iyagoo garwaaqsan** xaqiiqda ah in Xeerka Asaasiga ah ee Midowga Afrika, ayna ku jiraan qaar kale (inter alia), ayaa ku baaqaya baahida loo qabo in la horumariyo oo la ilaaliyo xuquuqda aadanaha iyo dadkaba, la xoojiyo hay'adaha dimuqraadiga ah laguna kobciyo dhaqanka dimuqraadiyadda lana hubiyo dawlad-wanaagga iyo talinta sharciga;

**Iyagoo ogsoon** baahida loo qabo in la ixtiraamo sharafta aadanaha iyo in la dardar-geliyo horumarinta dhaqaalaha, bulshada, iyo xuquuqda siyaasadeed ee la waafajinayo qodobbada Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadka iyo aaladaha kale ee la xiriira xuquuqda aadanaha;

**Iyagoo maanka ku haya** Baaqa 1990 ee ku saabsan isbedelada asaasiga ah ee aduunka ka dhacaya iyo saameynta ay ku leeyihiin Africa; ajendayaasha Qaahira 1994 ee Loogu Talo-galay Isu-keenidda Dhaqaale-bulsheedka Afrika; iyo Qorshe Ficil ka dhan ah xasaanadda oo uu qaatay Kal-fadhigii Sagaal iyo Tobanaad ee Golaha Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Xuquuqda Dadweynaha ee 1996 sida ku xigta uu ansixiyey Kal-fadhiga Afar iyo Lixdanaad ee kullanka caadiga ah ee Golaha Wasiirrada ee lagu qabtay Yaounde, Cameroon ee 1996 kaas iyo kuwa kale, waxay hoosta ka xarriiqeen baahida loo qabo in la dhawro mabaadi'da dawlad-wanaagga, jiritaanka sharciga, xuquuqda aadanaha, dimuqraadiyadda iyo ka-qeyb-galka caanka ah ee dadka Afrikaanka ah ee geedi-socodka dawladnimada.

**Iyagoo dareensan** saameynada xun ee musuq-maasuqa iyo ku-lug lahaanshaha xasilloonida siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqan ee Dalalka Afrika iyo saamaynta ba'an oo ay ku yeelan karto horumarka dhaqaale iyo bulsho ee dadyowga Afrika;

**Iyagoo yaqiinsan** in musuq-maasuqu uu wiiqayo isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka arrimaha bulshada iyo sidoo kale horumarka dhaqan-dhaqaale ee qaaradda;

**Iyagoo aqoonsan** baahida loo qabo in wax laga qabto sababaha salka u ah Musuq-maasuqa qaaradda;

**Iyagoo ka qanacsan** baahida loo qabo in la dejiyo oo la raaco, iyadoo ah arrinta mudnaanta la siinayo, siyaasad ciqaabeed caadi ah oo looga gol-leeyahay in bulshada laga ilaaliyo musuq-maasuqa, oo ay kamid yihiin qaadashada sharci-dejin ku habboon iyo tallaabooyin ka-hortag oo ku filan;

**Iyagoo go'aansan** dhisidda iskaashi ka dhexeeya dawladaha iyo dhammaan qeybaha bulshada rayidka ah, gaar ahaan haweenka, dhallinyarada, warbaahinta iyo waaxyaha gaarka loo leeyahay si loola dagaallamo musuq-maasuqa;

**Iyagoo dib u xusuusan** Qaraarka AHG-Dec 126 (XXXIV) oo uu ansixiyey kal-fadhigii caadiga ahaa ee Afar iyo Soddonaad ee Golaha Madaxda Qaramada iyo Dawladaha bishii Juun 1998 ee Ouagadougou, Burkina Faso, kana codsaday Xoghayaha Guud inuu qabto, isagoo la kaashanaya Guddiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga, kulan heer sare ee xeel-dheereyaal oo looga tashanayo qaabab iyo kheyraad looga qaadi karo caqabadaha ku gudban dhaqaalaha, xuquuqda bulshada iyo dhaqanka, oo ay kamid yihiin la-dagaallanka Musuq-maasuqa iyo dembi-qabad-la'aanta iyo soo-jeedin sharci-dejin habboon iyo tallaabooyin kale;

**Iyagoo dib u sii xusuusan** go'aanka kal-fadhiga 37aad ee caadiga ah ee Golaha Hoggaamiyeyaasha Gobollada iyo Dawladda UMA (OAU) ee lagu qabtay Lusaka, Zambia, bishii Luulyo 2001 iyo sidoo kale Baaqa lagu ansixiyey kal-fadhigii kowaad ee Golaha Midowga ee lagu qabtay Durban, Koonfur Afrika bishii Luulyo 2002, la xiriira Iskaashiga Cusub ee Horumarinta Afrika (NEPAD) oo ku baaqaya dejinta qaab isku-dubaridan si loola dagaallamo musuq-maasuqa.

**Waxay ku heshiiyeen sidan soo socota:**

### **Qodobka 1aad** **Qeexid**

1. Si waafaqsan hadafyada Heshiiskan;
  - “**Guddoomiye Guddiga**” waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Midowga Afrika;
  - “**La-wareegid**” waxaa loola jeedaa Ciqaab walba ama Natiijo kama-dambeys ah oo laga gaaray soo-celin hanti, faa'iido ama qalab taasoo ka timid amar

Maxkamdeed oo Sharci ah, iyadoo la raacayo faa'iidada in ay la leedahay xiriir fal-dembiyeed ama dembiyo kale lala xiriirinayo ama la xiriira musuq-maasuq;

- **“Musuq-maasuq”** waxaa loola jeedaa falal iyo Hawlo oo lala xiriiriyey fal-dembiyeed ay ku jiraan kuwa lagu qeexay heshiiskan gudahiisa;
- **“Maxkamad Sharci ah”** waxaa loola jeeda Maxkamad si hab-sami ah loogu dhisay sharci gudaha;
- **“Guddi Fullin”** waxaa loola jeedaa Guddiga Fullinta ee Midowga Afrika;
- **“Xaaraan-ku-hodmid”** waxaa loola jeedaa kor-u-kac muhiim ah ee hantiyeed ee ku aaddan Sarkaal dadweyne ama qof kasta oo aan Sharaxaad Maan-gal ah aan ka bixin karin dakhligiisa;
- **“Ganacsi gaar loo leeyahay”** waxaa loola jeedaa Ganacsiga ee dhaqaalaha Qaranka oo ku hoos jira Milkiyat gaar loo leeyahay taasoo qoondeynta kheyraadka wax-soo-saaritaan uu xakameynayo xoogga suuqa, oo ka duwan Awoodda Dawladda iyo qeybaha kale ee dhaqaalaha taasoo aan hoos iman Ganasiga Dadweynaha ama Xukuumadda;
- **“Faa'iido musuq-maasuq”** waxaa loola jeedaa Hanti walba Maadi ama Macnawi, Guurto ama Ma-guurto, la taaban karo ama aan la taaban karin, iyo Dokuminti kasta ama aalad qaanuun oo caddeynaya lahaansho ama dano lagu kasbaday hantiyahaas fal musuq-maasuq ah;
- **“Sarkaal Dadweyne”** waxaa loola jeedaa Sarkaal kasta ama Shaqaale dawladeed ama hay'adaha dawladda oo ay ku jiraan kuwa la xushay, la magacaabay, ama loo doortay inay Hawlo qabtaan ama matala Magaca Dawladda ama u adeega Dawladda heer kasta oo ay Darajadeedu tahay;
- **“Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday”** waxaa loola jeedaa dawladda Xubinta ka ah oo laga codsaday in ay soo gudbisoo ama bixiso gacan-siin si waafaqsan heshiiskan;
- **“Dawladda Xubinta ah ee codsanaysa”** waxaa loola jeedaa Dawladda Xubinta ka ah oo sameynaysa codsi soo-gudbin ama gacan-siin la xiriira heshiiskan;
- **“Dawladda Xubinta ah”** waxaa loola jeedaa Dawladda xubinta ka ah Midowga Afrika taasoo ansixisay ama qeyb ka noqotay heshiiskan iyo oggolaatay ansixinta qodobbada heshiiskan ama gaaritaanka Guddomiyaha Golaha Midowga Afrika.

2. Heshiiskan gudahiisa, Kali ahaanta waxaa wehliya wadar iyo dhanka kale oo loo rogo (vice versa).

### **Qodobka 2aad Himmilooyin**

Himmilooyinka Heshiiskan waa in:

1. Gacan laga geysto lana xoojiyo horumarinta Afrika ee Dawlad kasta oo xubin ah, aaladaha looga baahan yahay ka-hortaga, haba-galka ciqaabta iyo baabi'inta musuq-maasuqa iyo Fal-dembiyeedyada lala xiriirinayo, qeybaha Dawladda iyo qeybaha gaar loo leeyahay.

2. Gacan laga siiyo, lana fududeeyo isla markaana la xaqiijiyaa iskaashiga u dhaxeeya Xubnaha Qaramada si loo hubiyo hal-beegyada wax-ku-oolka ah iyo tallaabooyinka ka-hortaga, ka-daba-tagga ciqaabta, iyo baab'inta musuq-maasuqa iyo fal-dembiyeedyada la xiriira ee Afrika.
3. La isku-duwo lana turxaan-bixiyo siyaasadaha iyo shuruucda ka dhexeeya Xubnaha Qaramada iyadoo looga gol-leeyahay ka-hortag ka-daba-tag, ciqaab iyo baabi'in Musuq-maasuqa Qaarada oo idil.
4. Gacan la siiyo dhaqan-dhaqaalaha iyadoo la horumarinayo ka-leexinta caqabadaha si loo gaaro baraare dhaqaale iyo bulsho iyo xuquuq-dhaqameed sida ugu wanaagsan ee Xuquuqda Madaniga iyo tan siyaasadda.
5. Asaaso xaalada ugu habboon ee dhiirri-gelinta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ee maareynta Arrimaha Dadweynaha.

### **Qodobka 3aad Mabaadi'**

Qaramada Xubnaha ka ah heshiiskan waxay fulinayaan in ay dhaqan-geliyaan mabaadi'da soo socoto:

1. In ay tixgeliyaan Dimuqraadiyada iyo Hay'adaha, ka-qeyb-galka shacbiga, talinta sharciga iyo dawlad-wanaagga.
2. In ay texgeliyaan bini'aadanimada iyo xuquuqda dadka si waafaqsan Axdiga Midowga Afrika oo ku aaddan Bini'aadanka iyo Xuquuqda dadka iyo Heshiisyada kale ee Xuquuqda aadanaha.
3. Daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ee Maareynta Arrimaha Dadweynaha.
4. Xoojinta Cadaaladda Bulshada si loo xaqiijiyo isku dheelitinnaanta horuminta Dhaqaale-bulsheedka .
5. Dhaleecaynta iyo diidida falalka musuq-maasuqa ah, xad-gudubyada la xiriira iyo dembi-qabad-la'aanta.

### **Qodobka 4aad Baaxadda Dabaqaada**

1. Heshiiskani wuxuu ku dabaqmayaa falalka soo socda ee musuq-maamsuq iyo xad-gudubyada la xiriira:
  - b) Ugu-yeejarid ama guddoon, si toos ah ama si aan toos ahayn, mas'uul dawladeed ama qof kale, wixii alaab ah oo qiimo lacageed ah ama macaash kale ah, sida hadiyad, adeeg, ballan-qaad, ama faa'iido naftiisa ama Qof kale,

ama hay'ad, iyadoo la beddelayo fal kasta ama ka-tagitaan kasta oo lagu fuliyo hawlihiisa dadweyne;

- t) Siinta ama deeq, si toos ah ama si aan toos ahayn, Mas'uul dawladeed ama qof kale, alaabo kasta oo qiimo lacageed ah ama macaash kale ah, sida hadiyad, adeeg, ballan-qaad, ama faa'ido naftiisa, ama qof kale ama hay'ad, iyadoo lagu beddelayo wixii Ficil ama tixgelin gaar ah si loo fuliyo hawlihiisa dadweyne;
- j) Bandhig kasta ama badeecad leh qiimo lacageed leh, si toos ah ama aan toos ahayn, Mas'uul Dawladeed ama qof kale ama siin ama waxtar kale dawladeed ama qof kasta oo ujeeddadiisu tahay helitaanka gargaarka sharci-darrada ah ee nafsadiisa ama nafsadeeda ama dhinac saddexaad;
- x) U wareejinta shakhsi dawladeed ama qof kale, ula-jeedooyin aan la xiriirin ujeedooyinka loogu talo-galay, maslaxadiisa ama faa'ido qof saddexaad, hanti kasta oo Gobolka ama ha'yadeeda, loo wareejiyo hay'ad madaxbannaan ama shaqsi, laga helay mas'uulkii hore ee xafiiskaas;
- k) Beecinta ama siinta, ballan-qaadida, codsashada ama aqbalaadda, si toos ah ama si aan toos ahayn, faa'idooyin kasta oo xad-dhaaf ah oo ka yimaada ama qof kasta oo hagitaan ama u shaqeeya, awood kasta, hay'ad waax gaar ah, naftiisa ama nafteeda ama cid kale , isaga ama iyada inay ku kacdo, ama ka joogso ficil, iyada oo jebinaysa waajibaadkeeda ama waajibaadkeeda;
- d- Beecinta, siinta, ballan-qaadida ama aqbalida si toos ah ama saameyn kasta oo aan habooneyn go'aan qaadashada qofkasta oo qabanaya hawlaha qeybta dadweynaha ama waaxda gaarka loo leeyahay iyadoo la tixgelinayo, in faa'iidada aan caadiga ahayn ay tahay mid nafsadeeda ama cid kale, iyo sidoo kale codsi, rasiid ama aqbalaadda deeqda ama ballan-qaad ka faa'iideysigaas, iyadoo la tixgelinayo saameyntaas , in saamaynta la adeegsado ama in kale ama in kale ama saameyntu ay keenayso natiijada la rabay;
- r) Xaraan-ku-hodmid;
- s) Adeegsiga ama qarinta wixii ka soo baxa fal kasta oo lagu tilmaamay Qodobkan;
- Sh) Ka-qeyb-qaadasho maamule ahaan, la-maamule, wakiil, baare, kaalmeeye ama fududayn xaqiiqada kaddib, ama qaab kale oo kamid ah guddiga ama isku-day guddi, wada-shaqeyn kasta ama shirqool lagu sameeyo, fal kasta oo lagu tilmaamo qodobkan.

2. Heshiiskan wuxuu sidoo kale ku dabaqmayaa heshiis dhexmara labo dhinac ah ama in ka badan oo kamid ah Xubnaha Qaramada ee la xiriira fal kasta ama hawl-qabad kasta ee musuq-maasuq iyo xad-gudubyada la xiriira ee aan lagu xusin Heshiiskan.



## **Qodobka 5aad**

### **Sharci-dejinta iyo Tallaabooyin kale**

Si waafaqsan ujeedooyinka ku xusan Qodobka 2aad ee Heshiiskan, Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Ay qabatimaan sharci-dejin iyo tallaabooyin kale ee looga baahan yahay in lagu dejiyo xad-gudubyada, ficillada lagu xusay Qodobka 4aad faqradiisa 1 ee Heshiiskan.
2. Ay xoojiyaan tallaabooyinka kontaroolka qaranka si loo hubiyo in dejinta iyo hawl-gallada shirkadaha shisheeye ee ku sugan dhulalka Xubinta Qaran ay ku xirnaan doonaan ixtiraamka sharciga qaran ee dhaqan-galka ah.
3. Ay dhisaan, gacanta ku hayaan, iyo in ay xoojiyaan hay'adaha madaxa-bannaan ee dawliga ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa ama wakaaladaha.
4. Ay qabatimaan sharci-dejin iyo tallaabooyin kale oo abuuri kara, joogtaynaya laguna xoojinayo xisaabinta gudaha, hanta-dhawrida iyo nidaamyada dabogalka, gaar ahaan dakhliga dadweynaha, risiidhaha dakhli-ururinta iyo cashuuraha, kharashyada iyo hab-raacyada kiraynta, soo-gadashada iyo maareynta badeecadaha iyo adeegyada dawladda.
5. Ay Qabatimaan sharci-dejinta iyo tallaabooyinka kale ee lagu ilaalinayo dadka xog-bixiyeyaasha ah iyo markhaatiyada musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, oo ay ku jiraan ilaalinta aqoonsiyadooda.
6. Ay qabatimaan tallaabooyin xaqiijinaya in muwaadiniintu soo sheegaan dhacdooyinka musuq-maasuqa iyagoo aan ka cabsanayn aargudasho.
7. Ay qabatimaan tallaabooyinka sharci-dejinta ee qaranka si loo ciqaabto kuwa sameeya warbixinnada beenta ah iyo kuwa si ku-talo-gal ah u bixiya warbixin ka dhan ah dadka aan waxba galabsan ee musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira.
8. Ay qabatimaan isla markaana xoojiyaan qaababka kor loogu qaadayo aqoonta bulshada si loo ixtiraamo wanaagga dadweynaha iyo danaha dadweynaha, iyo wacyiga lagula dagaallamayo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada dugsiyada iyo wacyi-gelinta warbaahinta, iyo kobcinta jawi karti u leh ixtiraamka anshaxa.

## **Qodobka 6aad**

### **Dhaqitaanka Faa'iidooyinka Musuq-maasuqa**

Xubnaha Qaramadu waxay qabatimayaan sharci-dejintaas iyo tallaabooyinka kale ee lagama-maarmaanka u ah in lagu aburo xad-gudubyo fal-dembiyeed:

1. Beddelka, wareejinta ama tuurista hantida, iyadoo la ogyahay in hantida noocaas ah uu ka dhasho musuq-maasuq ama xad-gudubyo la xiriira ujeeddadooda qarinta ama ka dhigeysa asalka sharci-darrada ah ee hantida ama caawinta qof kasta oo ku lug leh gelitaanka xad-gudubka inuu ka baxsado cawaaqibka sharciga ah ee falkiisa ama falkeeda.
2. Qarinta ama u ekaanta dabecada dhabta ah, isha, goobta, dabecadda, dhaqdhaqaaqa ama lahaanshaha ama xuquuqaha la xiriira hanti ee dhaxalka la xiriira musuq-maasuq ama xad-gudubyada la xiriira;
3. Sheegashada, haysashada ama isticmaalka hantida iyadoo la og yahay waqtiga helitaanka, in hantidaasi la dhaxlay musuq-maasuq ama xad-gudubyo la xiriira.

### **Qodobka 7aad**

#### **La-dagaallanka Musuq-maasuqa iyo Xad-gudubyada la Xiriira ee Adeegga Dadweynaha**

Si loola dagaallamo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee adeegga dadweynaha, Qaramada Xubnaha ah waxay isku hawlayaan in:

1. Ay weydiistaan dhammaan ama saraakiisha dadweynaha ee la magacaabay inay caddeeyaan hantidooda waqtiga la wareegista xafiiska inta lagu gudo-jiro iyo muddadooda xafiiska adeegga dadweynaha.
2. Ay abuuraan guddi gudaha ah ama hay'ad la mid ah oo loo idmaday inay dejiso xeer-anshaxeed oo ay kormeeraan hirgelintiisa, kuna wacyi-geliyaan kuna tababaraan saraakiisha dadweynaha arrimaha anshaxa.
3. Ay horumariyaan tallaabooyinka anshax-marineed iyo hab-raacyo baaritaan ee ku aaddan musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira iyadoo lagu keydinayo hannaanka tiknoolojiyada iyo kordhinta taxtar kuwa u xilsaaran arrinkan.
4. Ay hubiyaan daah-furnaanta, sinnaan iyo waxtarka maareynta hab-raacyada qandaraas-bixinta iyo kireynta ee adeegga dadweynaha.
5. Iyadoo la cuskanayo qodobbada sharciga maxalliga ah, xasaanad kasta oo la siiyo saraakiisha dawladda ma noqon doonto wax carqalad ku ah baarista eedeymaha ka dhanka ah iyo dacwad ku soo oogidda saraakiishaas.

### **Qodobka 8aad**

#### **Xaaraan-ku-hodmid**

1. Si waafaqsan xeerarka sharcigooda gudaha, Xubnaha Qaramada ayaa fulinaya in ay qabtimaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah in la aburo sharci jideynaya xad-gudub lid ku ah xaraan-ku-hodmida.

2. Xubnaha Qaramada ee aasaasay xad-gudub lid ku ah xaraan-kku-hodmidda ee sharcigooda gudaha, xad-gudub noocaas ah waxaa loo tixgelin doonaa fal musuq-maasuq ama xad-gudub la xiriira ujeedooyinka Heshiiskan.

**Qodobka 9aad**  
**Helitaan Macluumaad**

Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa sharci-dejintaas iyo talaabooyin kale si loo dhaqan-geliyo xuquuqaha helitaanka macluumaad kasta ee loo baahan yahay in gacan laga geysto la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira.

**Qodobka 10aad**  
**Maal-gelinta Axxaabta Siyaasadda**

Xubin Qaran kastaa waxay qabatimaysaa sharci-dejin iyo talaabooyin kaleba in:

- b) Ay mamnuucaan adeegsiga lacagaha lagu helo iyadoo loo marayo dhaqano sharci-darro ah iyo musuq-maasuq si loogu maal-geliyo axxaabta siyaasadeed; iyo
- t) In mabaadi'da daah-furnaanta Lagu daro maal-gelinta axxaabta siyaasadeed.

**Qodobka 11aad**  
**Hay'adaha Gaarka ah**

Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Ay qabatimaan tallabooyinka sharci-dejinta iyo talaabooyinka kale oo looga hortagayo la-dagaallanka falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee ay geystaan hay'adaha qeybta gaarka loo leeyahay.
2. Ay abuuraan aalado lagu dhiirri-gelinayo ka-qeyb-qaadashadooda hay'adaha gaarka loo leeyahay ee la-dagaallanka tartanka caddaalad-darrada, iyadoo la ixtiraamayo hannaanka qandaraasyada iyo xuquuqda hantida gaarka loo leeyahay.
3. Ay qabatimaan talaabooyinkaas kale ee laga yaabo inay lagama-maarmaan u yihiin ka-hortagga shirkadaha inay bixiyaan laaluush si ay ugu guuleystaan qandaraasyadooda.

**Qodobka 12aad**  
**Bulshada Rayidka iyo Warbaahinta**

Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Si buuxda looga qeyb-qaato la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira iyo in la faafiyo heshiiskan, iyadoo si buuxda looga wada qeyb-gelinayo Warbaahinta iyo Bulshada Rayidka ah.

2. Ay abuuraan jawi karaya in uu awood u siinaya bulshada rayidka iyo warbaahinta inay ku hayaan Dawladaha heerarka ugu sarreeya ee daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ku aaddan maamulka maareynta ee arrimaha dadweynaha.
3. Ay hubiyaan oo bixiyaan ka-qeyb-gelinta bulshada rayidka hannaanka korjoogteynta iyo la-tashiga bulshada rayidka ah ee hirgelinta heshiiskan.
4. Ay hubiyaan in Warbaahinta loo oggolaado helitaanka macluumaadka xaaladaha dacwadaha musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, iyadoo shuruud looga dhigayo in faafinta macluumaadka noocaas ah aysan saameyn xun ku yeelan hab-raaca baarista iyo xaqa helitaanka dhegaysiga garsoor caadil ah.

### **Qodobka 13aad** **Ikhtisaaska Maxkamadda**

1. Xubin Qaran kasta waxay lahaanaysaa ikhtisaas maxkamadeed oo ku aaddan falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriir marka:
  - b) xad-gudub lagu sameeyo guud ahaan ama qeyb ahaan gudaha xuduudeeda;
  - t) uu xad-gudub geysto mid kamid ah muwaadiniinteeda meel ka baxsan xuduudeeda ama uu falkaas ku kaco qof deggan xuduudeeda; iyo
  - j) dembilaha la tuhunsan yahay uu joogo xuduudeeda oo aysan u gudbinayn qofkaasi dal kale.
  - x) Marka xad-gudubka, in kastoo lagu galay meel ka baxsan xuduudeeda, uu saameynayo, si ku aaddan aragtidda Qaranka ay khusayso, danihiisa muhiimka ah ama dhaawac leh ama raad-reebyo waxyeello ah ama saameynta xad-gudubyadaas ay ku yeeshaan Xubinta Qaran.
2. Heshiiskani ma reebayo ikhtisaas ciqaabeed kasta oo ay fuliso Xubinta Qaran si waafaqsan shuruucdeeda gudaha.
3. Ka sokow faqradda (1) ee isla Qodobkan, qofna laguma maxkamadayn karo labo jeer isla hal xad-gudubi.

### **Qodobka 14aad** **Damaanad-qaadka Ugu Yar ee Garsoor Xaq ah**

Si waafaqsan shuruucda gudaha, qof kasta oo lagu eedeeyo inuu ku kacay falal musuq-maasuq iyo xad-gudubyo la xiriira wuxuu heli doonaa maxkamad caddaalad ah ee dacwadaha ciqaabta si waafaqsan damaanadda ugu yar ee ku tibaaxan Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga iyo wixii kale oo kasta ee la xiriira xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah oo ay aqoonsan yihiin Xubnaha Qaramada ay khuseeyso.

## **Qodobka 15aad** **Dib-u-celin**

1. Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa xad-gudubyada ay abuureen Xubnaha Qaran si waafaqsan Heshiiskan.
2. Xad-gudubyada ku jira ikhtisaaska heshiiskan waxaa loo qaadanaayaa inay ku jiraan shuruucda gudaha ee Xubnaha Qaran sida dembiyo u baahan dib-u-celin. Xubnaha Qaran waxay xad-gudubyadaas ku darayaan xad-gudubyada u baahan dib-u-celineed oo ku jira heshiisyada dib-u-celinta ee ka dhexeeya ama dhexdooda ah.
3. Haddii Xubin Qaran ka yeesho dib-u-celinta mid shuruud ku xiran ee jiritaanka heshiis dib-u-celin ay hesho codsi dib-u-celin ee ka timid Xubin Qaran oo uusan ka dhexayn heshiis noocaas ah, waxay u tixgelinaysaa heshiiskan inuu yahay aasaas sharci ah ee dhammaan xad-gudubyada uu heshiiskani khuseeyo.
4. Xubin Qaran oo aan sameynayn shardi ku xiran jiritaanka heshiis dib-u-celin waxay u aqoonsanaysaa xad-gudubyo uu heshiiskani ku dabaqmayo sidii xad-gudubyo dib-u-celineed oo iyaga dhexdooda ah.
5. Xubin Qaran kasta waxay fulinaysaa in ay celiso qof kasta lagu soo eedeeyey ama lagu helay xad-gudubyo musuq-maasuq iyo xad-gudubyo la xiriira, oo laga fuliyey xuduuda Xubin Qaran oo kale oo dib-u-centiisa uu codsaday Xubinta Qarankaas, si waafaqsan sharcigooda gudaha, heshiis kasta oo dib-u-celin oo ku dabaqmaya, ama is-af-garadyo dib-u-celin ama qorsheyaal jira oo ka dhexeeya ama u dhexeeya Xubnaha Qaran.
6. Marka Xubin Qaran xuduudeeda qof ku sugan lagu eedeeyo ama lagu helo xad-gudubyo oo ay diido in celiso qofkaas si waafaqsan in ay ikhtisaas u leedahay qaadidda xad-gudubyadaas, Xubinta Qaran ee laga codsaday waxaa waajib ku ah in ay u gudbiso dacwada si aan dib-u-dhac lahayn hay'adaheeda awoodda u leh si maxkamadayn loogu sameeyo, haddii aan si kale loogu raacsanayn Xubinta Qaran ee codsanaya, iyadoo loo soo sheegi doonaa natiijada kama-dambaysta ah Xubinta Qaran ee codsanaysa.
7. Iyadoo la raacayo qodobbada shuruucda waddanka iyo heshiisyada dib-u-celinta ee la dabaqi karo, waxaa u bannaan Xubinta Qaran ee la codsaday, kaddib markay ku qanacdo in duruufaha sidaas u baahan yihiin oo ay yihiin kuwo degdeg ah isla markaana ay codsanayso Xubinta Qaran in gacanta lagu dhigo qof la raadinayo wareejintiisa iyo qof xaadir ku ah dhulkeeda ama la qaado talaabooyin kale oo munaasib ah si loo hubiyo in qofkaasi ku sugan yahay hab-raacyada dacwo ee dib-u-celinta.

**Qodobka 16aad**  
**La-wareegidda iyo Hantidda & Hab-raacyadda la Xiriira Musuq-**  
**maasuqa**

1. Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa inay qaado talaabooyin sharci- dejinta ee lagama-maarmaanka u ah in awood la siiyo:
  - b) Mas'uuliyiin karti u leh inay baaraan, aqoonsadaan, raad-raacaan, maamulaan, xayiraan ama qabtaan qalabkii iyo waxyaabihii musuq-maasuqu ku xirnaa inta la sugayo xukunka kama-dambaysta ah;
  - t) La-wareegidda faa'iidooyin ama hanti, qiimaha u dhigmo faa'iidooyinkaas, laga dhaxlay, si waafaqsan xad-gudubyada lagu sheegay heshiiskan; iyo
  - j) Mag-dhaw faa'idada lagu helay musuq-maasuqa.
2. Xubinta Qaran ee laga codsaday waxay, sida uu u oggolaanayo sharcigeedu iyo si ku aaddan Xubinta Qaran ee codsanaysa, qabanaysaa isla markaana la wareegaysaa walax kasta:
  - b) kaasoo loogu baahan karo caddeyn xad-gudub ee la isweydiinayo; ama
  - t) kaasoo lagu helay natiijada xad-gudub loogu talo-galay soo-celinta la codsaday iyo kaasoo, waqtiga qabashada lagu helo dadka sheegatay ama la ogaado markaas kaddib.
3. Waxaa bananan Waxyaabaha lagu sheegay faqradda (2) ee Qodobkan, haddii ay arrinkaas Dalbato Xubinta Qaran in lagu wareejiyo Qarankaas xitaa haddii la diido wareejinta qof la codsaday ama laga cudur-daartay wareejintiisa geeri darteed, la waayo ama baxsado qofka la baadi-goobayo.
4. Marka walaxda la soo sheegay lagu helo qabasho ama la-wareegid xuduuda Xubinta Qaran ee laga codsaday kan dambe wuxuu karaa, si la xiriirta dacwad taagan ama dacwado ciqaab oo socda, si meel-gaar loo hayo ama loo gudbinayo Xubinta Qaran ee codsatay, oo shardigu yahay in loo celinayo Xubinta Qaran ee laga codsaday.

**Qodobka 17aad**  
**Qarsoodida Bankiga**

1. Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa inay qaado tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah ee lagu xoojinayo maxkamadaheeda ama hay'adaha kale ee awoodda u leh soo-saarista amarada la-wareegidda ama qaadashada dhaqaalaha bankiyada ama dukumintiyada ganacsiga oo leh aragti hirgelitaan ee heshiiskan.
2. Qaranka codsanaya ma adeegsanayo macluumaad kasta oo la helay taasoo lagu ilaalinayo sirta bankiga ujeeddo kasta oo aan ka ahayn dacwadda loo codsaday macluumaadkaas, haddii aan oggolaansho looga haysan Xubinta Qaran ee la codsaday.

3. Xubnaha Qaran ma dalban karaan sirta bankiga si ay u sababeeyaan diidmadda iskaashi la xiriira falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee ku aaddan qiyamka heshiiskan.
4. Xubnaha Qaran waxay iskood isugu hawlayaan inay galaan heshiisyo naftooda ah oo labo-geesood ah, si ay uga tanaasulaan sirta bankiyada ee ee xisaabaadka shakiga ku jira, isla markaana u oggolaadaan mas'uuliyiinta awoodda u leh inay ka helaan caddeymo kasta ee bankiyada iyo hay'adaha maaliyadeed, si waafaqsan ku-hoos-jirka Garsoorka, caddeyn kasta oo gacantooda ku jirto.

### **Qodobka 18<sup>aad</sup>**

#### **Iskaashi iyo Gargaar Qaanuun ee Wadajir ah**

1. Si waafaqsan sharciyadooda gudaha iyo heshiisyada dhaqan-galka ah, waa in ay si degdeg ah u bixiyaan iskaashi farsamo iyo wada-shaqeyn suurta-gal ah, marka ay uga soo baahdaan laamaha shaqada ku leh ka-hortagga musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh, haddii ay ahaan lahayd in laga hortago, la dabo-galo, la baaro, isla markaana la ciqaabo falalka musuq-maasuq iyo xad-gudubyada la xiriira.
2. Haddii labo Xubnood Qaran ama wax ka badan sameystaan xiriir dhexdooda ah iyagoo tixraacaya sharciyo mideysan ama hab-raacyo kale oo gaar ah, waa u bannaan tahay in ay sameystaan xiriir labo dhinac ah, iyagoo aan jebinayn qodobadda heshiiskan.
3. Xubnaha Qaran waxay sameysan karaan iskaashi dhexdooda ah oo ay isku weydaarsanayaan daraasadaha iyo cilmi-baarista ku saabsan sida loola dagaalamo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh, sidoo kale khibradaha dhanka ka-hortagga musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh.
4. Xubnaha Qaran waxay yeelanayaan iskaashi dhexdooda ah marka ay suurta-galka tahay iyagoo iska taageeraya arrimaha farsamadda marka la sameynayo barnaamijyada iyo xeerarka Anshaxa, iyo iyadoo la eegayo danaha hawl-wadeennada in la diyaariyo tababaro iyo aqoon-isweydaarsi ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo Xad-guduyada xiriirka la leh.
5. Xeerarka qodobkan ku xusan wax saameyn ah kuma yeelanayso waajibaadka lagu xusay heshiis kale oo labo-geesood ah ama in ka badan kaasoo xaqiijinaya qeyb ahaan ama dhammaan iskaashiga iyo isweydaarsiga sharciga ah ee arrimaha ku saabsan fal-dembiyeedyada.

6. Qodobkani ma xusayo axkaam u diidayso Xubnaha Qaran ka ah heshiiskan in midoodba midda kale u gudbiso kaalmo-sharciyeed ku habboon oo uu oggolaanayo xeerarkooda gudaha.

### **Qodobka 19<sup>aad</sup> Iskaashi Caalami ah**

Si loo gaaro iskaashi caalami ah oo mug leh, Xubnaha Qaran waxay:

1. Iskaashi la sameynayaan wadamada asal ahaan u leh shirkadaha jinsiyadaha badan (ka hawl-gala wax ka badan hal dawlad) si ay u caddeeyaan fal-dembiyeedka iyo ciqaabista ku-lug-lahaanshaha lacagaha sida qarsoodida ah la iskugu gudbiyo iyo qaab walbo oo laga dheehan karo musuq-maasuq marka lagu gudo-jiro isweydaarsiga hantida iyo ganacsiga caalamiga ah.

2. Xoojinta iskaashi goboleedka, qaaradeedka iyo midka caalamiga ah si looga reebo musuq-maasuqa hawlaha ganacsiga caalamiga ah.

3. Dhiirri-gelinta dhammaan wadamada si ay u sameystaan habab sharci-dejin oo lagama maarmaan ah si looga reebbo hawl-wadeennada in ay sii haystaan hantida ay ka sameeyeen laaluushka, iyadoo la xirayo akoonadda ay ku leeyihiin bankiyada dibadda iyo in la fududeeyo dib-u-soo-celinta lacagaha la kaayaday (la xaday) ama lagu helay si aan sharci ahayn wadamada asal ahaan lahaa.

4. Si dhow ula shaqeynayaan hay'adaha maaliyadda caalamiga ah, kuwa gobolka iyo kuwa ka farcama gobolka si looga baabi'yo musuq-maasuqa barnaamijyada dib-u-dhiska iyo iskaashiga, iyadoo la sameynayo hal-beegyo adag oo lagu hubinayo u-qalmidda iyo maamul-wanaagga murashixiinta marka lagu gudo-jiro siyaasadda guud ee horumarinta.

5. Iskaashadaan si waafaqsan axdiyada caalamiga ah ee xiriirka la leh iskaashiga caalamiga ah ee la xiriira arrimaha xad-gudubyada iyadoo ujeedku yahay baaritaannada iyo hababka la xiriira fal-dembiyeedyada ku cad baaxadda heshiiskan.

### **Qodobka 20<sup>aad</sup> Awoodaha Qaran**

1. Iyadoo la eegaya ujeeddooyinka iskaashi iyo kaalmada sharci ee la isweydaarsanayo ee ku xusan heshiiskan, Xubin Qaran waxay la xiriiraysaa Madaxa guddiga, xilliga la saxiixayo ama la gudbinayo dokumentiyada oggolaanshaha, ama wakaaladda qaranka u xilsaaran xad-gudubyada lagu caddeeyey Qodobka (4) faqradiisa (1) ee heshiiskan.



2. Dawladda iyo wakaaladaha qaranka waxay mas'uul ka yihiin soo gudbinta iyo la wareegideeda dalabyada ku saabsan kaalmada sharciga iyo iskaashiga lagu xusay heshiiskan.
3. Hay'adaha ama Wakaaladaha Qaran waxay ka yeelanayaan xiriir toos ah, ujeeddooyinka Heshiiskan.
4. Dawladda iyo Wakaaladaheeda Qaran waxaa loo ogol yahay madax-bannaani ku filan, si ay u gutaan waajibaadka loo xilsaaray si wax-ku-ool ah.
5. Xubnaha Qaran waxay sameynayaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah hubinta in ay qabsoomaan waajibaadka loo xilsaaray hay'adaha qaranka ee u xilsaaran la-dagaallanka masuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh in ay heleen tababar iyo dhiirri-gelin ku filan si ay u gutaan waajibaadka loo xilsaaray si wax-ku-ool ah.

### **Qodobka 21<sup>aad</sup>**

#### **Xiriirka Heshiisyada kale**

Iyadoo la ilaalinayo Xeerarka ku cad qodobka (4) faqradiisa (1), Heshiiskani wuxuu ka gacan-sarreynayaa heshiis kasta ama heshiis labo- geesoodka ah ee ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh, oo ka dhexeeya labo dawlad iyo wax ka badan oo ka tirsan Xubnaha Qaramada Heshiiskan.

### **Qodobka 22<sup>aad</sup>**

#### **Farsamo Dabo-gal**

1. Waxaa laga dhisayaa guddi la-talin arrimaha musuq-maasuqa Ururka Midowga Afrika dhexdiisa.
2. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa 11 xubnood oo Golaha Fulinta Ururka ka dooran doono liis xeer-dheerayaal ah oo aan dhana u janjeernin (madax-bannaan), lehna hufnaan iyo hawl-karnimo ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh oo ay soo gudbiyaan Xubnaha Qaramada. Marka la soo xulayo xubnaha guddigan Golaha Fulinta waa in ay xaqiijiyaan metelaad isku-dheeli-tiran labada jinsi (rag iyo dumar) iyo metelaad degaan oo siman.
3. Xubnaha Guddiga iyaga ayaa qabsanaya hawlahooda gaarka ah.
4. Xubnaha Guddiga waxaa la magacaabayaa muddo labo sano ah, lana cusboonaysiin karo hal mar oo keliya.

5. Hawlaha Guddiga waxay noqonayaan:
- b) xoojinta iyo dhiirri-gelinta hawl-gallada lagu cirib-tirayo musuq-maasuqa ka jira qaaradda;
  - t) ururinta xogaha iyo dokumentiyada ku saabsan halka uu marayo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh ee ka dhaca gudaha qaaradda Afrika;
  - j) hormarinta qaababka ugu macquulsan ee lagu falanqeyn karo musuq-maasuqa iyo fal-dembiyeedyada xiriirka la leh, iyo ka-wacyi-gelinta bulshada saameynta xun ee uu leeyahay musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh;
  - x) tallo-siinta dawladaha qaabka ay u xallin karaan dhibaataada uu leeyahay musuq-maasuqa, iyadoo adeegsanaya ikhtisaaska garsoorkooda;
  - k) ururinta xogaha iyo falanqeynta shaqada shirkadaha jinsiyadaha badan (ka-shaqeeya wax ka badan hal dawlad) ee ka hawl-gala wadamada Afrika, iyo u-gudbinta xogahaas dawladaha sida lagu caddeeyey Qodobka 18 faqradiisa (1) ee heshiiskan;
  - d- tayaynta iyo xoojinta diiwaanno middeysan oo ay ku qoran yihiin shaqaalaha dawladda;
  - r) abuurista xiriir iskaashi oo lala yeelanayo Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Afrika, dadweynaha, bulshada rayidka, hay'adaha dawliga ah, kuwa aana-dawliga ahayn (NGOs), iyo urur-goboleedyada si looga wada-hadlo wada-shaqeynta lagu cirib-tirayo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh;
  - s) waxay Golaha Fulinta u gudbinayaan warbixinadda ku saabsan horumarada ay Xubin Qaran kasta sameysay iyo sida ay ugu hoggaansameen qodobadda heshiiskan; iyo
  - sh) qabashada hawl walba oo ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh oo ay u xilsaaraan laamaha qaabilsan sameynta siyaasadaha ee Midowga Afrika.
6. Guddigu wuxuu raacayaa xeerar u gaar ah ee hab-raac.
7. Xubnaha Qaramada waxay u soo gudbinayaan Guddiga muddo sanad gudihiis ah dhaqan-gelinta heshiiskan, horumarada laga sameeyey fulintiisa. Kaddibna Xubin Qaran kasta iyadoo raacaysa hab-raacyada xiriirka la leh, waxay warbixinadooda sanadkiiba mar u soo gudbinayaan Guddigan inta aysan furmin kulamada caadiga ah ee ay yeelanayaan qeybaha siyaasadda Midowga Afrika.

## **QODOBO GEBANGABO AH**

### **Qodobka 23<sup>aad</sup>**

#### **Saxiixid, Meel-marin, Kamid-noqosho iyo Dhaqan-gelin**

1. Heshiisku wuxuu u furnaanayaa saxiixid, meel-marin ama oggolaansho ee Qaramada Xubnaha ka Midowga Afrika.

2. Heshiiskani wuxuu dhaqan-gelayaa 30 (soddon) maalin gudahooda oo ka bilaabaneysa maalinta loo diiwaan-geliyey oggolaanshaha iyo kamid-noqoshada.
3. Heshiiskani wuxuu ka dhaqan-gelayaa dawlad walba oo dhinac ka ah oo oggolaatay kana mid noqotay loona diiwaan-geliyey dokumentiga 15aad ee oggolaanshaha, kaddibna ay ka soo wareegto 30 (soddon) maalin oo ka bilaabaneysa maalinta ay dawladu soo gudbisay dukomentigeeda oggolaansha iyo kamid-noqoshada.

### **Qodobka 24<sup>aad</sup> Ka-gaabsasho**

1. Xubin Qaran kasta waxaa u bannaan in ay soo gudbiso ka-gaabshiyaha marka la saxiixayo ama la oggolaanayo waanna in ka-gaabsigaasi noqdaa qodob ama wax ka badan oo kamid ah heshiiskan, waana inuusan ka hor-iman ujeedooyinka iyo nuxurka Heshiiskan.
2. Xubin Qaran kasta oo qeyb ka ah heshiiskan soonna gudbisay ka-gaabsigeeda, waxaa loo oggol yahay in ay ka laaban karto ka-gaabsashadeeda marka ay u saamaxdo duruufta. Ka-laabashadeeda waxay u soo gudbineysaa Guddoomiyaha Guddiga.

### **Qodobka 25<sup>aad</sup> Wax-ka-bedel**

1. Heshiiskan waxaa lagu sameyn karaa wax-ka-bedel, haddii ay Xubin Qaran codsi qoraal ah u soo gudbiso Guddoomiyaha Guddiga.
